

Khayraadka cuntada ee Washington

Tani waa liis macluumad ah oo kaa caawin kara codsiga gargaarka cuntada, helitaanka lacag lagu iibsado cuntada dukaamada raashinka iyo suuqyada beeralayda, iyo helitaanka meelo laga helo cunto bilaash ah.

Luuqadaha lagu heli karo macluumad kasta ayaa hoos ku taxan. Fadlan la xidhiidh qof ku caawin kara haddii macluumaadka aanu ku jirin luuqadaada.

Washington Connection (1-877-501-2233)

Waxaa lagu heli karaa luuqadaha Isbaanishka, Ruushka, iyo Shiinaha Dalbo gargaarka cuntada ee SNAP oo ku xidhnow barnaamijyada kale ee gargaarka cuntada ee dawladda.



Washington 211 (Dial 211)

Lagu heli karo Isbaanish
Ku xidhnow bangiyada cuntada deegaanka iyo barnaamijyada kale ee cuntada.

WithinReach (1-800-322-2588)

Lagu heli karo Isbaanish
Hel caawinta raadinta bangiyada cuntada, barnaamijyada cuntada iyo barnaamijyada kale ee gargaarka cuntada



Maabka bangiyada cuntada iyo barnaamijyada cuntada

Lagu heli karo Ingiriis kaliya
Hel bangiyada cuntada iyo barnaamijyada cuntada ee Washington.

Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta barnaamijka (WIC) (1-800-322-2588)

Lagu heli karo luqado badan
Codso si aad u hesho cunto, la-talin nafaqo, iyo taageero naasnuujin. WIC waxaa loogu talagalay dumar kasta oo uur leh ama umusha ka dib, dhallaanka, iyo carruurta ka yar da'da 5.



Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) (1-877-501-2233)

Lagu heli karo luqado badan
Dalbo SNAP si aad u hesho lacag aad ku bixiso cuntada. SNAP waxaa lagu isticmaali karaa dukaanka raashinka, suuqyada beeralayda, iyo qaab onlayn ee Amazon, Walmart, iyo Safeway.

SNAP Market Match

Lagu heli karo Ingiriis kaliya
Dadka adeegsada gargaarka SNAP waxay ku iibsan karaan miro iyo khudaar badan iyagoo isticmaalaya Match Market SNAP. Soo hel suuqyada beeralayda ee ka qayb qaadanaya barnaamijkan.



SNAP Produce Match

Lagu heli karo Ingiriis kaliya
Raadso dukaamada raashinka siinaya dukaamaystiyaasha \$10 kuuboon ee miraha iyo khudaarta marka ay SNAP ku iibsadaan ugu yaraan \$10 ee miro iyo khudaar cusub oo barafaysan.

